IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisho, 30 Oktoobar 1984 L. 2 R 10

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 49 ee 9 Agoosto 1984, Xeer Nidaamiyaha Xabsiyada Dalka.— BOG- 847

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN IYO ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER, 1.9.84 Lumid Jeegag War. L. 489715 — 489717 — 489723 ku qoran Cabdullaahi Aadan Naaleye. » 892

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

# QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, Lambar 49 taariikh 9 Agoosto 1984, Xeer Nidaamiyaha Xabsiyada Dalka

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82 Faqradda 14 ee Dastuurka.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Xabsiyada lamb. 7 soona baxay 30.12.71

ISAGOO AQOONSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in la soo saaro Xeer Nidaamiye lagu fulinayo Sharciga Xabsiyada.—

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.
Wuxuu Soo Saarayaa Xeer Nidaamiyaha Soo Socda:

## QAYBTA KOOWAAD TILMAAMO GUUD

### Qod. 1aad

### CADDEYN

Haddii aan si kale loola jeedin Xeer Nidaamiyaha Gudihiisa ereyada hoos ku qoran, waxaa loola jeedaa sida soo socota:

1) Xeerka, Waxaa weeye Xeerka xabsiyada ee Lambar 7 soona baxay 30.12.1971.

2) Taliyaha, Waxa weeye Taliyaha Ciidanka Aslubta Soomaaliyeed.—

3) Taliyaha Xabsiga, Waxa weeye Sarkaalka Mas'uulka ka ahXabsi.

4) Sarkaalka Caafimaadka, Waxa weeye qofka haya jagada maamulka Caafimaadka meesha uu ku yaallo Xabsi.—

5) Amarada Joogtada ah Waa Amarada uu soo saaro Taliyaha CiidankaAsluubta Soomaaliyeed.

Qod. 2aad

## HABKA LOOGU DHAQMO XEERKA, X. NIDAAMIYAHA IYO AMARADA JOOGTADA AH

Hirgelinta Xeerka, Xeer Nidaamiyaha iyo Amarada Joogtada ah, waxaa Saldhig u ahaanaya Mabaadi'da hoos ku qoran, iyadoo mar kasta la tixgelinayo dhaqanka kala duwan ee kooxaha Maxaabiista ah sida xeerku uu dhigayo—

b) In habsamida iyo nidaamka guud ee la xiriira dhaqanka iyo dhaqaalaha Maxaabiista loo dhawro si adag, isla markaasna habsamida lagu dhaqayo Maxaabiista, waa in aanu marnaba dhaafsiisanayn sugidda daryeelka xasiloonida nabadgelyada kana soo hor jeedin u jeedada laga leeyahay hayntooda—

t) Himilada laga leeyahay haynta Maxbuuska waxaa saldhig u ah dib u abuuridda nolol ku dhisan shaqo laguna barbaariyo qaab bulshanimo oo ku habeysan Mabaadi'da toosan ee Hantiwadaagga ah.

j) Had iyo Jeer maamulka Maxaabiista waa inuu ahaadaa mid dhiirigelinaya isku kalsoonida qofka, xil kasnimadiisa ku abuuraysa kor u qaadka hammadiisa (Moral) iyo sharafkiisa qofnimadiisa, isla markaana waa in la dareensiiyo laguna beero qiiro waddaninimo daacadnimo iyo caadeysi shaqo jaceyl, sarana loo qaado aragtidiisa siyaasiga ah, si uu u garto waxtarka nolosha fiican ee bulshada cusub uguna dhex noolaan karo markii xabsiga laga siidaayo.

x) Anshaxa wanaagsan ee xubnaha Ciidanka Asluubtu waa hormuudka toosinta Maxbuuska, waxaana weeyebar tilmaameedka asluubta iyo nolosha dambe ee Maxbuuska—

Qod. 3aad

## HABKA MAGACAABIDDA XABSIYADA

Markii loo baahdo in meel lagu magacaabo xabsi ama xarun Asluubeed, Taliyaha Ciidanka Asluubta ayaa talo ka siinaya Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo

Arrimaha Diinta, kaas oo soo saari doona Xeer (Decre) ku dhawaaqaya aasaaska Xabsiga ama Xarunta.

## QAYBTA LABAAD

## KALA SAARIDDA XABSIYADA IYO MAXAABIISTA

### Qod. 4aad

### HAYNTA MAXAABIISTA XUKUMAN

Isagoo Taliyuhu Nabadgelyada awgeed amar ka dhiiba mooyaane, maxaabiista Xukumani, oo ay ku jiraan la-haayayaasha lagu soo xiro Xeerka gaarka ah, hayntoodiina ay soo xalaaleeyeen Hay'adihii sharci ahaan awoodda u lahaa, muddooyinka xukunkooda waxay ku dhammeysanayaan.—

b) Xabsiga Degmada lagu xukumay, haddii muddada xarigga ka hadhay aanay ka badnayn hal Sano markii xukunka ugu dambeyey lagu dhawaaqay.

t) Xabsiga Gobolka haddii muddada xarigga ka hadhay aanay ka badnayn laba sano, markii xukunka ugu dambeeyey lagu dhawaaqay.

j) Xabsiyada dhexe ama kuwa gaarka ah, maxaabiista dilka sugeysaa, ama kuwa xarigoodu ka badan yahay laba sano marka xukunka ugu dambeeyey lagu dhawaaqay iyo ku soo noqodyaasha iyo dambi caadaystayaasha xarigoodu ka badan yahay hal sano.

x) Xuruufaha B.T. iyo J. ee qodobkan waxaa ka reeban maxaabiista caruurta ah, haweenka iyo maxaabiista laga soo xiro ciidamada qalabka sida, kuwaas oo hayntoodu ay hoos ku xusan tahay.—

1. Maxaabiista caruurta ah waa in lagu hayaa meel ka gaar ah maxaabiistawaaweyn inta loo beddelayo xabsiga caruurta ah, sida uu dhigayo xeer lambar 13 soona baxay bishii Maarso 1970kii, ama meeshii kale ee loo qoondeeyey/Xaddiday.—

2. Iyadoo la tixgelinayo caafimaadka iyo xannaanada u gaarka ah haweenka, qofkii xarigiisu ka badan yahay 6 bilood waxaa lagu haynayaa oo kali ah xabsiga Gobolka ama xabsiyada dhexe, qaybta Haweenka.

3. Maxaabiista laga soo xiro Ciidamada qalabka Sida, waxaa lagu haynayaa xabsiyada dhexe iyo kuwa gaarka ah qayb ka gooni ah maxaabiista kale, meeshii suurtagal ahi inta loo bedelayo xabsi loo qoondeeyay.

4. Sida uu dhigayo qodobka 15aad, xarafka 5aad ee xeerka xabsiyada, markii ay dhacdo in haweenka sidata cunug Maxkamadi u aqoonsato inay cunugaas ku haysato xabsiga gudihiisa, ama haweeney uur lahayd ay Ilmo ku dhasho xabsiga, Ilmahaasu wuxuu hooyadiisa kula noolaan karaan xabsiga gudihiisa muddo aan ka badneyn laba sano. muddada labada sanadood ka hor, Taliyaha Xabsigu waa inuu u tabaabusheeyaa sidii ilmahaas loogu wareejin lahaa ehelladiisa. Hase yeeshee, haddii ay sugnaato in ilmahaasu aanu lahayn ehel lo, waxaa lagu wareejinayaa xarumaha lagu xannaaneeyo dhallinta Kacaanka.—

Qod. 5aad
HAYNTA MAXAABIISTA AAN XUKUNNAYN.

Isagoo Taliyuhu daryeelka nabadgelyada awgeed talo ka dhiibta mooyaane, maxaabiista aan Xukunnayn ama la-haayayaasha amarkii hayntooda ay ku bixiyeen Hay'adihii sharci ahaan awoodda u lahaa xeerarka gaarka ah (Special laws), welise sugaya xalaalintii hayntooda, waxaa lagu haynayaa xabsiyada hoos ku qoran.

La-hayayaasha waxaa lagu haynayaa xabsiyada ku qoran jideeyaha xarigga. Hase yeeshee, daryeelka nabadgelyada awgeed, ama ciriiridartii, waxaa loogu bedeli karaa amarka Taliyaha, xabsi kale oo munaasib u ah, markaas oo kale, waa in la ogeysiiyaa hay'addii soo xirtay.—

QAYBTA SADDEXAAD
QABASHADA M/STA IYO GUDIGA SOO DHAWEYNTA

Qod. 6aad
QABASHADA MAXAABIISTA

Taliyaha Xabsigu waa inuu ku dhaqmo habka soo socda ee la xiriira qabashada maxaabiista.

1. Kaddib marka jideeyaha xarigga ama amarka xarigga la hubiyo sida uu dhigayo xarfaha 2aad iyo kan 3aad ee Qod. 15aad ee xeerka, qofka ku qoran jideeyaha ama amarka xarigga waxaa la geynayaa qolka habeen dhaxa ilaa iyo aroorta dambe oo marka la soo gudbin doono qeybta soo dhaweeynta si diiwaan gelinta loo dhameeystiro iyo si caafimaadkiisa iyo hawl qabadkiisa loo hubiyo.—

2. Waxaa lagu soo celinayaa qeybta soo dhaweeynta kadib marka caafimaadkiisa la soo hubiyo si loo sii yo dharkiisa iyo alaabtii xabsiga.—

3. Qaybta soo dhaweeynta waxay hor geynayaa Maxbuuska Guddiga soo dhaweeynta, kaasoo markuu tixgeliyo xaaladaha la xiriira Maxbuuska oo dhan maga caabaya qolka jiifkiisa tababarkiisa iyo shaqo geyntiisa.—

4. Ma jiro maxbuus bedeli kara hoygiisa ama alaab isaga la siiyay iyadoo aanay jirin oggolaanshaha laga helo karo guddiga soo dhaweynta.—

KU-SIMAHA GUDDOOMIYAHA GUD. SOO DHAW/TA

Qod. 7aad

Sida uu dhigayo Qod. 21aad ee Xeerkan, maqnaashaha Taliyaha Xabsiga sabab kasta ha ahaatee, waxaa xilkii Guddoomiyaha Guddiga soo dhaweeynta la wareegaya xubinta Ciidanka halkaas jooga oo derajo ahaan ugu xiga Taliyaha Xabsiga.—

Qod. 8aad

XILKA GUDDIGA SOO DHAWEYNTA

GUDDIGA SOO DHAWEYNTA WAA INUU:

b) Deg deg u arkaa maxbuus kasta marka uu xabsiga soo galo uuna ka taliyaa Go'aana ka gaaraa meeleyntiisa.—

t) Si buuxda ugu sheegaa maxbuus kasta oo soo gala xabsiga wax allaale wixii la xiriira nolqshiisa xabsiga iyo xeerarka iyo xeer nidaamiyaha, gaar ahaan ku wa la xiriira waajibaadkiisa iyo xuquuqdiisa, isla mar-

kaasna waa inuu ka dhaadhiciyaa jidka uu u leeyahay Rafcaan qaadasho, arji cafis ama dib u fiirin xukun.

j) U diyaariyaa maxbuus kasta tababar shaqo haddii muddada xarigiisu ay suura gelinayso tab/kaas.

x) U habeeyaa maxbuus kasta shaqo geyn iyadoo la tixgelinaayo da'diisa, mudada xarigiisa, dhaqankiisa hore iyo waaya-aragnimadiisa, aqoontiisa, xirfaddiisa gaar ahaaneed iyo caafimaadkiisa.—

kh) Lixdii biloodba mar u fiiriyaa barnaamijka tababarka farsamada gacanta ee maxbuuska, waana inuu tixgeliyaa shaqada maxbuuska oo uu horukac ka gaari waayey, isagoo u bedelaya qeybta ugu habboon qeybaha kale ee tabarrada farsamada gacanta.

d) Gaarsiiyaa Taliyaha Xabsiga sugnaashaha maxbuu kasta oo cusub oo aan shaqeyn karin, sababtoo ah xagga caafimaadka, lixaadka, da'da ama maskaxda si loogu habeeyo shaqo fudud oo ku habboon.

## QAYBTA AFARAAD
## NOLOSHA MAXAABIISTA IYO MAAMULKA XAB/DA

### Qod. 9aad
### FURIDDA IYO XIRIDDA XABSIYADA

1. Xabsiga waa in maalin kasta la furaa 6. oo subaxnimo haddii aanay jirin sabab gaar ah oo keeni karta dib u dhigidda furidda sida nabadgelyada, caafimaadka iyo hawadoo xumaata.—

2. Xabsiga waa in maalin kasta la xiraa 5. oo galabnimo lana hubiyaa sugnaashaha maxbuus kasta oo ku xiran Xabsiga inuu ku jiro qolkiisa.—

3. Xil la kala wareega Xabsiga furidiisa iyo xiridii saba waa inuu goob joog ka ahaado Sarkaalka hawsha leh (DUTY OFFICER) iyo kan habsamida ama Ku xigeenkiisa.—

Qod. 1oaad
HURDADA

1. Maxaabiistu waxay seexanaysaa qolol waaweyn iyo edegyo (Cells) hadba sida dhismaha xabsigu yahay ama ay la noqoto Taliyaha Xabsiga.

2. Maxaabiista labka ah iyo kuwa dhiddiga ah waa in gooni loo kala hayaa, waana in lagu kala xereeyaa guryo kala gaar ah sida uu dhigayo qod. 22aad ee xeerka, Furayaasha Qufulada Xabsiga Haweenka waa in ay gacanta ku hayaan xubin haween ah, xubin lab ahna ma geli karto qeybtaama Xabsiga haweenka iyadoo aanay la socon dheddig. maxaabiista caruurta ah ee cimrigoodu ka yar yahay 18 Sano waa in lagu hayaa meel ka gaar ah Maxaabiista kale ee waaweyn, haddii ayna meeshaas ku oolin Xabsiga u gaar ahi, inta loo bedelayo Xabsiga Caruurta sida uu dhigayo Xeerka lambar 13 soona baxay bishii Maarso 1970kii, Maxaabiista Dhallinyarada ah ee da'doodu u dhexeyso 14-18 Sano waa in laga soocaa Maxaabiista waaweyn loona hooyaa meeshii ay hadba suuragal tahay.—

Qod. 11aad
EDEG TAKOORKA

Xabsi kasta waa inuu yeeshaa meeshii suuragal ah edegyo takoor oo loogu tala galay Maxaabiista Aslubta xumi la timaada. Edeg kasta oo edegyadaas ka mid ah waa inuu caddeeyaa Sarkaalka Cafimaadka ee Xabsiga inuu u qalmo isticmaalka loogu tala galay.

Qod. 12aad
NADAAFADDA XABSIGA

1. Nadaafadda Xabsigu waa in ay dhawrnaataa guud ahaan, gaar ahaanna guryaha jiifka, Musqulaha, edegyada iyo jikooyinka. Xilka nadaafadu wuxuu saaran yahay Maxbuus kasta, waxaana ku waajib ah inuu daryeelo ogogoshiisa, dharkiisa, weelkiisa, kutubkiisa iyo alaabta kale ee uu gaar ahaan ugu dhaqmo.

2. Guryaha iyo edegyada waa in loo furaa irdaha iyo dariishadaha maalinta inteeda hore si ay u qoraxay staanuna dabeeshadaan.

3. Si loo dhawro nadaafada guud ee Xaxsiga, Guryaha jiifka ee maxaabiista waa inay lahaadaan musqulo u gaar ah (FIASH LATRINES).

## Qod. 13aad
## BAARISTA MAXAABIISTA

1. Baarista Maxaabiista waa inay u dhacdaa habka ugu hufan si looga helo wax allaale wixii mamnuuc ah ee uu qarsanayo.

2. Waa inan maxbuuska lagu qaawin maxbuus kale hortiisa lana baarin, baaris dhaafsiisan dul ka taabad (RUB DOWN).—

3. Soo gelitaanka ugu horeeya ee maxbuuska soo galo xabsiga wixii lagaga helo baaris ee mamnuuc ah, waa laga reebayaa, waana loo meeleynayaa sida uu dhigayo qodobka 20aad ee Xeerku.

4. Wax allaala wixii maxbuus lagaga helo baaris ama si kale, intuu Xabsiga ku jiro isagoo xukuman ama la-haye ama Garsuge ah, waa lagala wareeyayaa waxa ayna ka mid noqonayaan hantida Xabsiga sida uu dhigayo qodobka 65aad ee Xeerku.

## Qod. 14aad
## HANTIDA MAXBUUSKA

1. Soo gelitaanka maxbuuska cusub haddii laga helo alaab aan dhigaalmeyn (PERSHABLE NATURE) waa in lagu amraa in uu uga talo baxo sida ugu deg deg badan ee suuragal ah.—

2. Soo gelitaanka maxbuuska wax allaale wixii alaab ah ee cudur faafin keeni kara ee laga helo waa in si deg deg ah loo baabi'iyaa, iyadoo wax magdhaw ah oo la siinayo maxbuuskaas aanay jirin, sida uu dhigayo qodobka 20aad, qeybtiisa 2aad ee Xeerka.

3. Lix bilood ka dib siideyntiisa ama dhimashadiisa oo la faafiyay maxbuuska dadkiisa ama wakiilkiisa oo soo doonan waayo alaab Xabsiga u taalay, sida uu dhigayo qod. 20aad ee Xeerku wuxuu Taliyahu ku war-

4. Lix bilood ka dib dhaqan galka Xeer Nidaamiyahan, wax allaala wixii alaab ah ee Xabsiga lagu hayo oo aan cidina soo sheegan waa la baabi'inayaa. Haddii la gado wixii ka soo 'baxa waxaa lagu wareejinayaa hantida Xabsiga.

Qod. 15aad
QORAALKA TILMAAMAHA MAXAABIISTA

Taliyaha Xabsigu waa inuu hubiyaa ama amraa in la hubiyo magaca, da'da, dharaka, calaamadaha u gaarka ah iyo wax allaale wixii kale ee la xiriira maxbuuska soo gelitaankiisa loona qoro hab laguna qoro qaabka loogu tala galay.—

Qod. 16aad
WARKA IYO ASHTAKADA MAXAABIISTA

Maxbuus kasta soo gelitaankiisa waa in loo sheegaa wax allaale wixii ku saabsan qaynuunka lagu dhaqo maxaabiista kooxdiisa ah, xagga habsamida ah waxaa looga baahan yahay, habka sharciga ah ee lagama maarmaanka u ah inuu ku garto xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa iyo sidii uu naftiisa u qabadsiin lahaa nolosha Xabsiga.—

Qod. 17aad
SAWIRKA

Maxbuus kasta oo xukuman ee xariggiisuna ka 'badan yahay Lix bilood waa in sawir laga qaadaa, waana [illegible] nuqulka sawirkaas lagu dhejiyaa galkiisa, asalkana (the negative) waa in la kaydiyaa. Nuqul sawirkaas ka mid ah lama siin karo qof ama hay'ad aan sharcigu awood u siin.—

Qod. 18aad
CUNTADA MAXAABIISTA

1. Cuntada Maxaabiista ee ku xusan qod. 27aad ee Xeerka waxay ahaaneysaa sida ku faahfaahsan lifaaqa. (B). ee Xeer Nidaamiyaha, kaasoo nuqulkiisa lagu dhejinayo meel ka mid ah Xabsiga oo laga akhari karo.

2. Maxbuus kasta waa inuu helaa biyo cabitaan ku hab'boon ee uu cabo.

3. Cuntada ku tilmaaman xubinta 1aad ee qod. ee ay ku jirto cunno ciqaabeed waxaa bedeli kara Taliyaha Xabsiga isagoo raacaya talada Sarkaalka Caafimaadka ee Xabsiga oo u cuskanaya daryeelka Caafimaadka Maxbuuska.—

Qod. 19aad
HUGA MAXAABIISTA

1. Huga Maxaabiista ee ku xusan qodobka 28aad ee Xeerka wuxuu noqonayaa sida ku faahfaahsan lifaaqa (t) ee Xeer nidaamiyahan.

2. Huga xabsiga ugu yaraan waa in todobaadkiiba mar la dhaqaa lana isku bedelaa, Huga xabsigu waa in aanu ahaan mid qofnimada maxbuuska waxyeeleyn kara ama hoos u dhigi kara.

3. Markii maxbuus la geynaayo Maxkamad, warqad shaqo ama meel gaar ah oo aan loo baahneyn in la ogaado maxbuusnimadiisa, waxaa loo oggolaanayaa hugiisa ama hu! kale ee aan muujineynin inuu maxbus yahay.—

Qod. 20aad
GOGOSHA MAXAABIISTA

1. Gogosha Baxaabiista ee ku xusan qod. 29aad ee Xeerka waxay ahaanaysaa sida ku faahfaahsan lifaaqa (J) ee Xeer Nidaamiyahan.

2. Gogosha Maxiibiista waa in la qoraxeeyaa sida hadba uu amar ku dhiibo Taliyaha Xabsigu.

Qodobka 21aad
QUBEYSKA MAXAABIISTA

Meeshii ay suuragal tahay waa in maxbuus kasta la siiyaa fursaduu maalin kasta ku qubeystaa, si kasta ba ha ahaatee, waa in maxaabiistu korkeeda nadaafiyaan lana siiyo sida hadba awooddu tahay biyo & saabon

Qodobka 22aad
TIMA JARIDDA MAXAABIISTA

1. Maxbuus kasta oo Xukuman xarigiisuna ka ba-

dan yahay bil, waa in timaha loo jaraa ama laga xiiraa iyadoo la tixgelinaayo caafimaadkiisa, haddii uu leeyahay gar ama shaaribo. waa in laga gaabiyaa.

2. Haweenka xiran waa in aan timaha laga jarin haddii aanu Sarkaalka Caafimaadka ee Xabsigu caafimaad iyo nadaafad daraadeed talo ku dhiibin in laga jaro ama laga xiiro.—

3. Maxaabusta Garsugayaasha iyo Rafcaanleydu timahooda waxaa loo deynayaa sidii ay ahaayeen markii ay soo galeen xabsiga haddii aynan jirin sabab kale oo kalifeysa in la jaro ama la xiiro.

4. Haddii aanay wax u dhimin nadaafadda iyo caafimaadka guud timalahaanshaha maxbuuska, maxbuus kasta bisha u dambeysa xarigusa waa in laga xiirin timaha. haddii uu sidaas rabo. Sida qodobkan ku xusan waxaa ka reeban wax allaale wixii ku dhisan aasaas Diini ah ee la xiriira timo jaridda iyo gar Iyo shaarib xiiridda qofka.

### Qodobka 23aad
### J I M I C S I

Maxaabiista oo dhan, kuwa caafimaad xumida darteed Sarkaalka caafimaadka uga reebay iyo kuwa takooran maahee,. waa in ay helaan jimicsi joogto ah sida uu dhigayo amarka joogtada ah, ama sida uu kolba ku taliyo Taliyaha xabsigu, maxaabiista fadhiga ku hawl gasha ama ku takooran edegyada gaarka ah waa in lagu siiyaa banaanka edega ama qolka shaqada jimicsi aan ka badneyn hal saac maalintii, haddii aan sarkaalka caafimaadka xabsigu si kale ku talin, ama aan daryeelka nabadgelyada ka hor imaan.

### Qodobka 24aad
### MIISAANKA MAXAABIISTA

1. Maxaabiista Xabsiga dheer oo dhan ee ku xiran xabsiyada dhexe ama kuwa gaarka ah waa in bishiiba mar loo miisaamaa koox koox. galbaha Khamiista ama maalmaha Jimcaha. maxbuus kastaa waa in miisaankiisa lagu qoraa galkiisa.—

2. Taliyaha Xabsigu waa inuu hor dhigaa Sarkaa ka Caafimaadka maxaabiista miisaankoodu uu aad hoos ugu dhacay, si loo baaro sababta keentay hoos u dhacaa kaddibna wax looga qabto—

Qodobka 25aad
MAMNUUCIDDA KHAMRADDA IYO WAXYAABAHA KALE EE MASKAXDA DOORIYA

Soo gelitaanka xabsiga waxaa la oggoleyn waxyaabaha hoos ku taxan oo aan sinnaba maxbuus loogu oggolaan karin helitaankooda iyo ku dhaqankooda.

1) Wax allaale wixii cabitaan ah ee Alkolo ku jirto (Alcoholic Drinks).

2) Xashiishka.—

3) Afyuunka.—

4) Heroyiinka.—

5) Kookoyiinka.—

6) Binjiga.—

7) Qaadka.—

8) Iyo wax allaale wixii kale ee dooriya ama doorin kara xiska qofka.—

QEYBTA SHANAAD SHAQADA XABSIGA

Qodobka 26aad
SHAQADA MAXAABIISTA

b) Sida uu dhigayo qod. 25aad ee xeerka, maxaabiista xukuman ee dhan oo ay ku jiraan maxaabiista la haayayaasha ah ee hayntooda ay soo xalaaleeyeen Hay adihii awoodda u lahaa, waa in ay ka shaqeeyaan meeshii loo diro, una shaqeeyaan habkii uu amar ku dhiibo Taliyaha Xabsiga ama taliyuhu.

t) Meeshii ay suuragal noqon kartaba, waa in shaqada maxaamiista ku dhisantaa wadajir, bulsho ahaana waa in ay wax faa'iideynaysaa iyadoo ujeeddada ku ha boon tahay waxbarasho iyo tacab kordhin.—

j) Haddii ay ugu muuqato Taliyaha Xabsiga, in habsamida iyo nabadgelyada awgeed loogu baahan yahay in aanmaxbuus ka shaqeyn maxaabiista kale dhexdooda, wuxuu awood u leeyahay Taliyaha Xabsigu In Maxbuuskaas gaar ahaantiisa loogu shaqeeyo.

x) Taliyaha Xabsigu, Isagoo tixgelinaaya talada Sarkaalka Caafimaadka Xabsiga ama cuskanayo sabab kale oo meel mar ah wuxuu awood u leeyahay in uu amro maxbuus gooni u shaqeynayey in dib uga dhex shaqeysiiyo Maxaabiista kale.—

kh) Ku shaqeynta ama tababar shaqo ee Maxbuuska waxay bilaabmeysaa markii go'aanka xukunka Maxkamaddii ugu horaysay ku dhawaaqday. Maxbuuska Lahayaha ah waxaa ku shaqayntiisa dhaqan geleysaa markii Hay'addii sharci ahaan awoodda u lahayd soo Xalaaleysay hayntiisa.

Qodobka 27aad

MAXAABIISTA AAN SHAQEYN KAREYN

Wakhti kasta ha noqotee, haddii la arko maxbuus xukuman ama La haye ah in aanu shaqeyn kareyn shaqo caadi ah, xagga Caafimaadka, da'da ama iin kale awgeed, maxbuuskaas waxaa loo dhiibayaa shaqooyinka fudfudud ee hoos ku xusan;

b) Tulmaha Fudud.
t) Beer Falow (Gardening).
j) Nadiifinta ama shaqo kale oo fudud.
x) Sidii hadba Taliyaha Xabsiga ay ula ekoonaato

Qodobka 28aad

QORIDDA SHAQADA MAXAABIISTA

Xabsi kasta waa in shaqada Maxaabiista maalin kasta loo qoraa loona habeeyaa sida hadba Taliyuhu amar ku bixiyo.—

Qodobka 29aad

SAACADAHA SHAQADA

Saacadaha ay Maxaabiistu shaqeynayaan waxay ahaanayaan sida lagu tilmaamo hadba amarada joogta-

da ah inta laga soo saarayana, waxay ahaanayaan sida uu Taliyuhu amar ku bixiyo.—

Qodobka 30aad
C E Y M I N

1. Taliyaha Xabsiga waxaa ku waajib ah in uu ka hor tago wax allaale wixii halis gelin kara daryeelka iyo Caafimaadka Maxaabiista shaqeysa.—

2. Haddii Maxbuusku ku dhaawacmay isagoo wa- Xabsiga sababna ayan u ahayn dadaal daraadiis, feejignaan la'aantiis, Taliyaha Xaxsiga wuxuu awood u leeyahay in uu amro in la siiyo samarsiin.

3. Haddiise Maxbuuska ku dhaawacmo shaqada do shaqada Xabsiga ama dhaawac ku yimid dadaal darro ama hawl gabid ka timid xubin Ciidanka ka mid ah, markii laga baaraan dego dacwadiisa lana ogaado saba baha keenay dhaawacaas, Ciidanku waa inuu bixiyaa wixii magdhaw ah oo u dhigma dhaawaca gaaray Maxbuuska, kaddibna Ciidanku weydiisto Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo la waafajinayo shuruucda Dalka u degsan.—

Qodobka 31aad
QIIMEYNTA ABAALGUDKA

1. Maxaabiista ka shaqaynaysa shaqooyinka aqoonta u baahan, kuwa xirfad yaqaanka ah, haddii shaqadu tahay mid wax soo saar leh, waxaa la siinayaa abaalgudka soo socda, una qalanta sida waafaqsan qodobka 26aad ee Xeerkan.

b) Marka uu soo bandhigo Taliyaha Xabsigu Maxbuus asluub fiican leh, heerka shaqo wax soo saariddiisuna sarreyso, aqoontiisuna gaarsiisan tahay heer saanac, waxa Taliyuhu awood u leeyahay in uu u oggolaado Maxbuuskaas oo kale in uu u gudbo heerka 1aad, kaasoo abaalgudkiisu yahay Sh.So. 7/= maalintiiba inta uu shaqeynayo lana siinayo bil kasta dhammaadkeeda.

t) Markay Taliyaha Xabsiga la noqoto in Maxbuus qofnimadiisa iyo aqoontiisuba gaarsiisan yihiin in loo aqoonsado farsamayaqaan heerka sare ah, wuxuu gala yaa heerka labaad ee abaalmarin dheeraad ah, wuxuuna yeelanayaa abaalgud gaarsiisan Sh So. 5/ maalintii uu shaqeeyaba laha siiyo bil kasta'ba dhammaadkeeda.

j) Markay Taliyaha Xabsiga la noqoto in Maxbuus akhlaaqdiisu wanaagsan tahay loona aqoonsado inuu yahay farsamayaqaan, wuxuu gelayaa heerka 3ad ee abaalmarin dheeraad ah, wuxuuna yeelanayaa abaalgud ah Sh.So. 3 maalintii uu shaqeeyaba lana siiyo bil kastaba dhammaadkeeda.

x) Maxbuuskii ka mid ah Maxaabiis haysa shaqo wadajir ah, oo wax soo saar leh, ama la barayo xirfad gaar ah, wuxuu galayaa heerka 4aad, wuxuuna yeelanayaa abaalgud ah Sh.So. 2.50 maalintii uu shaqeeya'ba lana siinayo bilkastaba dhammaadkeeda.

2. Ku magacaabidda ama geynta heerka koowaad waxaa leh Taliyaha marka uu warbixin ka helo Taliyaha Xabsiga uu ku jiro Maxbuusku ama madaxda ka mas'uulka ah meesha uu ka shaqeeyo Maxbuusku.

3. Ku magacaabidda ama geynta heerka labaad iyo kan saddexaad waxaa leh Taliyaha Xabsiga markii uu warbixin ka helo madaxda ka mas'uuuulka ah meesha uu max'buuska ka shaqeeyo—

## Qodobka 32aad
## KU DHQMIDDA ABAALGUDKA

1. Maxbuusku wuxuu awood u leeyahay inta uu xukuman yahay inuu ku dhaqmo ilaa 1/3 oo ka mid ah abaalgudkuu shaqeystay, uuna siisto alaab loo oggol yahay. Wixii haraa u ah Taliyaha Xabsiga ayaa u meeleynaya, si uu kayd ugu noqoto, waxaana la siinayaa Maxbuuska marka uu xariggiisu dhammaado.

2. Haddii maxbuus uu doono in la siiyo dhammaan ama qeyb ka mid ah abaalgudkiisa xaaskiisa ama ilmihiisa, waa in loo oggolaadaa markuu sidaa ka codsado. Taliyaha Xabsiga.—

### Qodobka 33aad
### FASAXYADDA

Daryeelka nadaafadda Xabsiga iyo karinta cunnadooda inooyaane, guud ahaan maxaabiistu shaqo ma leh maalmaha jimcayaasha iyo fasaxyada Qaranka.

### Qodobka 34aad
### HABKA HEEREYNTA HOR U KACA

Maxaabiista Xukuman oo dhammi waa in ay xariggooda ku dhammeystaan habka heereynta hor u kaca sida uu dhigayo qod. 24aad ee xeerku, kaas oo loogu dhaqmi doono sida soo socota.—

1. Habka heereynta awgii, dhérarka xarigga maxaabiista waxa weeye isku darka Xukunnada isdaba jooga ah oo dhan.—

2. Maxaabiista ku jirta heer ka mid ah habka heereynta hor u kaca, waa inay shaqeeyaan, hadba siday suuragal u tahay, shaqo waxbarasho ah ama qiimo wax soo saarid leh.—

3. Meeshii shaqo ay jirto, maxbuus alla maxbuuskii shaqada haya, waa in abaalgud loo siiyaa sida uu dhigayo qod. 31aad ee xeer nidaamiyahan.

### Qodobka 35aad
### HEERKA KOOWAAD

Marka la xukumo maxbuus, wuxuu gelayaa heerka koowaad wuxuuna ku jirayaa heerkaas muddo hal sano ah, ama hadduu yahay maxbuus xukunkiisu ka yar yahay hal sano, muddada xariggiisa oo dhan maxbuuskaas lama geyn karo heerka labaad, isagoo la yimaadda habsami iyo muteysi mooyaane, isla markaasna 3dii biloodba ee muddadaas ugu dambeeya aanu la imaan wax demi ah.—

### Qodobka 36aad
### HEERKA LABAAD

Maxbuuska u gudbaya heerka labaad wuxuu heerkaas ku jirayaa muddo laba sano ah, umana gudbi karo heerka saddexaad isagoo la yimaada habsami iyo akh-

laaq wanaag mooyaane, lixdii bilood ee muddadaas u dambeeyayna aan wax dembi ah la imaan.—

### Qodobka 37aad
### HEERKA SADDEXAAD

Maxbuuska u gudbaya heerka saddexaad wuxuu ku jirayaa heerkaas muddo dhan 4 sano, umana gudbi karo heerka gaarka ah, isagoo la yimaada habsami iyo akhlaaq fiican mooyaane, sanadkii muddadaas ugu dambeeyayna aan la imaan wax dembi ah.—

### Qod. 38aad
### HEERKA GAARKA AH

Maxbuuska u gudba heerka gaarka ah wuxuu ku dhammaysanayaa xarigiisa inta ka dhiman heerkaas.

### Qod. 39aad
### ASTAAMO U GAAR AH HEERARKA KALA DUWAN

Taliyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo astaamo kala duwan Maxaabiista ku jirta heerarkaa kala goonida ah.—

### Qod. 40aad
### HOOS U DHIGGA HEERKA

1. Heerka gaarka ah iyo heerka 3aad mooyaane, Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in maxbuus ka... yimaada dembi ama anshax xumi, uu geeyo ciqab ... heerka uu ku jiro kan ka hooseeya. Maxaabiista ...a heerka gaarka ah iyo kan 3aad, ee la timaada ... ama anshax xumo, Taliyaha Xabsigu wuxuu ka ...inayaa xog waran maxaabiistaas, isagoo warsanaya ...aliyaha in la geeyo maxaabiistaas heerka ay ku jiraan ...n ka hooseeya.

2. Maxbuuskii heerkiisa hoos loo dhigay kuma ...on karo heerkiisii hore isagoo ku jira lix bilood, hee dambe mooyaane, wax dembi ahna la imaan mud/s.

3. Maxbuuskii laba jeer hoos loo dhigo, heerkiisa ... a celin karo heerkiisii hore iyadoo ay jirto sabab ... ah oo Taliyuhu tixgeliyay mooyee, markaas oo la ... karo maxbuuskaas fursad kale.

Qodobka 41aad

ABAALMARIN DHEERAAD AH

Hirgelinta habsamida Maxaabiista iyo shaqo u taba barkooda awgeed, waa in Taliyuhu ka dhisaa xabsi kasta hab ama habab abaal marin dheeraad ah una qalma maxaabiista ku kala jirta heerarka kala duwan.

Qodobka 42aad

HEERARKA ABAALMARINTA DHEERAADKA AH

Abaalmarinta dheeraadka ee Maxaabiista ku jirta heerarka kala duwan waxay ahaanaysaa sida soo s/ta.

b) HEERKA LABAAD:

marka maxbuusku u gudbo heerka labaad, wuxuu yeelanayaa:

1. In Hannuuniye loo magacaabi karo.

2. In uu Xabsiga ku dhex mari karo ilaalis la'aan.

3. In uu dooran karo barashada xirfadda uu jecel yahay, ama uu siiwato xirfadduu hore u yaqaanay.

t) HEERKA SADDEXAAD:

Markuu heerka Saddexaad u gudbo maxbuusku wuxuu yeelanayaa intii abaalmarin dheeraad ah uu ku la haa heerka labaad, waxa kale oo uu yeelanayaa:

1. Hadduu doono in uu guriga dibadda ka joogi karo xiritaanka xabsiga duhurnimo.

2. Hal lebbis oo dheeraad ah iyo saabuun oo loo labanlaabo markii saabuun la bixiyaba.

3. Hal busto oo dheeraad ah.—

J) HEERKA GAARKA AH.

Maxbuuska ku jira heerka gaarka ah wuxuu yeelanaya:

1. Wax allaale wuxuu yeeshay markuu ku jiray heerka 3aad.—

2. Sakiin xiirasho toddobaadkiiba hal mar in la siiyo.

3. Dhiinsoole hal xabbo lixdii biloodba.—

4. Isku joog dacas ah hal (1) saddexdii biloodba.

5. Joodari (80 x 1·80) hal xa'bbo.—

6. In la xareeyo hal saac kadib xiritaanka Xa'bsiga.

## QEYBTA LIXAAD
## CAAFIMAADKA MAXAABIISTA

### Qodobka 43aad
### WAAJIBAADKA GUUD IYO XILKA SARKAALKA CAAFIMAADKA.

1. Sarkaalka Caafimaadka ee lagu xusay qod. 31aad ee Xeerka waa inuu:

b) Maxbuus kasta u baaraa si isdaba joog ah:

t) Baaraa maalin kasta maxbuus kasta oo dil loo haysto, ka dilka lagu xukumay, ama takooran.

j) Kormeerkaa maxaabiista shaqaynaysa wakhti ka wakhti.—

x) Wargeliya Taliyaha Xabsiga markuu arko maxbuus aad u buka oo u baahan wax ka qabasho dhaafsiisan awooddiisa.—

kh) Ugu yaraan bishii mar uu kormeeraa xabsiga oo dhan isagoo fiiro gaar ah siinaya alaabta wax lagu kariyo iyo qala'bka Caafimaadka Xabsiga.—

2. Sarkaalka Caafimaadku waa inuu baaraa Maxaabiista wakhtiyada soo socda:

b) Soo gelitaanka maxbuuska, markii maxbuus loo bedelo xa'bsi kale, iyo
j) Bixitaanka Maxbuuska.

3. Haddii maxbuus xarigiisu dhamaday markuu baxayo lagu arko ama uu qabo cudur joogto ah, ama mid faafa, waxaa la hor geynayaa Sarkaalka Caafimaadka, waxaana lagula dhaqmayaa hadba talada uu ka dhiibo Sarkaalka Caafimaadku.

4. Haddii la arko in maxbuus qaba cudur faafa ama la kala qaado, Sarkaalka Caafimaadku waa inuu markaaba tallaabooyinka ku habboon ka qaadaa uguna hor tagaa si aanu cudurkaasi ugu faafin xabsiga iyo Maxaabiista.—

5. Sarkaalka Caafimaadka haddii uu ku ogaado kormeerkiisa iyo baaristiisa in loo baahan yahay in wax laga beddelo xagga shaqada, cuntada dharka, jiifka ama alaabta la xiriirta maxbuus ama koox maxaabiis ah, wuxuu awood u leeyahay inuu u soo bandhigo Taliyaha Xabsiga ra'yigiisa oo qoraal ah.—

Qodobka 44aad

BUUGGA UU MAAMULAYO SARKAALKA C/MAAKU

Sarkaalku Caafimaadku waa inuu maamulaa buugaagta iyo galalka hoos ku xusan.—

b) Buugga muujinaya magaca cudurka iyo daawada maxbuus kasta oo buka

Buug si buuxda u muujinaya maxbuus allaalle maxbuuskii ku dhinta xabsiga, oo aan ahayn kuwa xukunka dilka ah lagu fuliyay, oo caddeynaya.—

1) Dib u raaca Caafimaadkiisa.

II) Sababta dhimashada.

III) Daaweynta.—

Iv) Xogwaran ku saabsan muuqiisa dhimashadii kaddib (markii la sameeyo dhimasho kaddib baaris), oo ay wehliyaan wixii tilmaamo gaar ah ee ay la noqoto in loo baahan yahay.

i) Diiwaan uu ku qoro faallooyinka iyo talooyinka uu hadba ka bixiyo Xabsiga iyo Maxaabiista.

Qodobka 45aad

TALLAALKA IYO DURISTA MAXAABIISTA

1. Haddii ay la noqoto Sarkaalka Caafimaadka lagama maarmaan, Caafimaadka maxaabiista ama ka xubnaha Ciidanka ee Xabsiga ka shaqeeya ama ka dadwe-

ynaha awgii, wuxuu awood u leeyahay in uu qalqaal tallaalka ama duridda maxaabiista ama xubnaha Ciidanka.—

2. Maxbuuska diida in la tallaalo ama la duro, waxaa la qaadanayaa in uu galay gef ka mid ah gefafka yar yar ee Xabsiga, sida ku xusan qod. 47aad, xarafkii ...aad ee xeerka Xabsiyada.—

QEYBTA TODDOBAAD HABSAMIDA MAXAABIISTA

Qodobka 46aad
TALLAABOOYINKA HABSAMIDA

Tallaabooyinka Habsamida iyo nabadgelyada ee la qaadayaa maxaabiista, waa in loogu dhaqmaa oo keli ah sida ay dhigayaan xeerka, xeer nidaamiyaha iyo amarada joogtada ah.—

Qodobka 47aad
ISTICMAALKA XOOGGA

1. Xubin Ciidanka ka mid ah ma isticmaali karto xoog aan loo baahneyn. Haddii loo baahdo in xoog la isticmaalo waa in ula jeeddadiisu ku habeysan tahay daryeelka, xasiloonaanta iyo nidaamka. Waana in aanu dhaafiisnayn heerka loo baahan yahay.

2. Xubin Ciidanka ka mid ahi kuma fulin karto Maxbuus ciqaab aanu Xeerku awood u siin.

3. Daandaasi, awood sheegasho, anshax xumo iyo ... gudub bani aadnimo uma bannaana xubin Ciidanka ka mid ah in uu kula dhaqmo ama kula kaco Maxbuus.

Qodobka 48aad
CUNTO CIQAABEED

Cunno ciqaabeedka ku xusan qod. 54aad ee xeerka, wuxuu ku faahfaahsan yahay lifaaqa (X).

Qodobka 49aad
KU TAKOORKA EDEG GAAR AH

1. Maxbuuskii ku riira ciqaab (Edeg takood) asluub xumo awgeed waxaa arki kara oo keli ah.—

b) Xubnaha guddiga booqoshada Xabsiyada.

t) Sarkaalka Caafimaadka Xabsiga.

j) Taliyaha Xabsiga ama Wakiilkiisa.

x) Xubnaha Ciidanka ku shaqo leh.

2. Maxbuuskii ku jira ciqaab edeg takoor, waa in la sookormeeraa had iyo goor maalintiiba iyo habeen-kiiba xubin Ciidanka ka mid ah, oo uu Taliyaha Xabsi-ga hawshaa u magacaabay.

## Qodobka 50aad
## CIQAAB DHAMEYSASHO

Maxbuuskii loo beddelo xabsi kale isagoo ku jira edeg takoor, asluub xumo awgeed, wuxuu ku dhammaa-sanayaa qaybtii ciqaabta ka hartay Xabsiga cusub ee loo beddelay.—

## Qodobka 51aad
## QALABKA XASILINTA

1. Qalabka xasilinta, sida katiinadaha, silsiladaha, b[illegible] iyo shaatiga adag waa in aan loo isticmaal[illegible] aab ahaan, qalabka xasilinta waxaa loogu isticmaala-yaa sida soo socta.—

b) Ka hor tagga fakashada marka beddel jiro ama Maxbuuska Maxkamad ama takhtar la hor geynayo, iyadoo lagu tala gelayo in laga furo Maxbuuska qalab-ka xasilinta marka la hor keeno hay'ad caddaaladeed, tu maamul ama Takhtar.

t) Amarka Taliyaha Xabsiga si looga ilaaliyo ma xbuuska in uu naftiisa ama naf kale halis geliyo ama in uu khasaaro u geysto hanti.

j) Asbaab Caafimaad ku dhisan markuu ku tali-yo Sarkaalka Caafimaadku.

2. Habka iyo sida loogu isticmaalayo qalabka xasilinta waxaa soo habeynaya Taliyaha, wuxuu ku soo saarayaa amarada joogtada ah. Qalab xasilinta isticmaalkiisu waa in inaanu dhaafin inta iyo hadba mudada loo baahan yahay.—

Qodobka 52aad
MAAMULKA BUUGAGGA CIQAABTA

1. Waa in xabsi kasta uu yaalaa buugga ciqaabta.

2. Taliyaha Xabsigu waa inuu buugga geliyaa ama amraa in la geliyo maxbuus kasta oo lagu ciqaabay qod. 50aad iyo kan 55aad ee xeerka isagoo muujinaya taariikhda, nooca dembiga iyo ciqaabta.—

QEYBTA SIDEEDAAD BOOQOSHOOYINKA IYO QORITAANKA WARQADAHA MAXAABIISTA XUKUMAN

Qodobka 53aad
BOOQOSHOOYINKA IYO QORITAANKA W/QADAHA

1. Iyadoo lagu xirayo shuruudaha lagama maarmaan uu u moodo Taliyaha Xabsigu dhawritaanka nabadgelyada, habsamida nidaamka Xabsiga iyo ka hortaga dembiyada, xiriirka Maxaabiista Xukuman ay la yeelanayaan bulshada oo aanu ku jirin Qareennadoodu wuxuu ahaan doonaa sida soo socta.

b) Soo gelitaanka Maxbuuska wuxuu xaq u yeelanayaa warqad uu qorto iyo booqasho aan ka badneyn ... daqiiqadood.—

t) Beddelaadda Maxbuuska xabsi kale loo beddelo wuxuu xaq u leeyahay warqad beddel oo uu u qorto qaraabadiisa.—

2. Wixii aan ahayn (b) iyo (t) kor ku xusan, booqashooyinka iyo qoritaanka warqadaha Maxaabiista Xukuman waxay ahaan doonaan sida soo socta.—

b) Maxaabiista Xukuman ee ku jirta heerka 1aad ... xaq u leeyihiin warqado iyo booqasho 15 daqiiqo ... todobaadkiiba mar.

t) Maxaabiista Xukuman ee ku jirta heerka gaar ... waxay xaq u leeyihiin in ay qortaan laba warqadood helaanna laba booqasho oo 15 daqiiqadood midkiiba tahay toddobaadkiiba mar.—

Qodobka 54aad

BOOQASHADA MAXAABIISTA BUKTA

Haddii maxbuus aan u bukaa uu codsado in qof qaraabadiisa dhow ka mid ah uu soo booqdo, Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu oggolaado booqashada, isagoo tixgelinaya daryeelka nabadgelyada iyo talada Sarkaalka Caafimaadka. Booqashadaasi waxay u dheer tahay maxbuuska booqashooyinka ku xusan qodobka 53aad.—

Qodobka 55aad

BOQASHADA UU MAXBUUS SOO BOOQANAYO QOF QARAABADIISA DHAW AH OO DHINTAY AMA DHIMANAYO.—

Haddii maxbuus ka dhinto aabbe, hooyo, afadiisa, ilmihiisa, ama walaalkiisaba, oo maxbuuskaasi uu codsado inuu soo booqdo qofkaas, ama ka qayb galo duugtiisa, Taliyaha Xabsigu, isagoo tixgelinaya daryeelka nabadgelyada, wuxuu awood u leeyahay inuu maxbuuska u oggolaado booqashada ama ka qeyb galka duugta inaydka, markaas oo kale waa inay jirtaa warbixin qoraal ah oo ka soo baxday maamulka Cusbitaalka, maxaxda qayota Booliska, Xoghayaha degmada ama hay'addii kale ee warbixin sugan arrintaas ka dhiibi karta oo caddeyneysa jiritaanka arrintaas.—

Qodobka 56aad

SHURUUDAHA LA XIRIIRA BOOQASHOOYINKA

1. Seddax qof tiro ka badani ma booqan karto maxbuus isku mar.—

2. Booqashada maxbuus la soo booqanayo waa in ay ahaataa saacadaha shaqada ee Xabsiga ama markii kale ee ay la noqoto Taliyaha Xabsiga. Hase yeeshee, sinnaba uma dhici karto in la oggolaado booqasho xiritaanka galabnimo ee Xabsiga kaddib.

3. Xubin Ciidanka ka mid ah ee loo xilsaaray inuu kor joogo booqashada, waa in uu u jiraa meel uu ka arki karo ama maqli karo hadalka dadku isa soo booqday inta ay booqashadu socoto oo dhan, Taliyaha Xabsiga oo si kale amar ku bixiya maahee.

4. Afka ay ku wada hadlayaan maxbuuska iyo qofka soo booqday waa in uu ahaadaa mid uu garanayo xubinta Ciidanka ka mid ah ee loo xilsaaray kor joogaha booqashada. Xubintu waxay awood u leedahay in uu joojiyo booqashada haddii uu dareemo sheekadu in ay waxyeellaynayso nidaamka habsamida Xabsiga ama ay ka soo hor jeeddo danta guud ee Qaranka ama caddaaladda. Isla markaasna waa inuu gaarsiiyaa arrinta Taliyaha Xabsiga si tallaabadii kale ee ku habbooneyd looga qaado.

5. Xubinta Ciidanka ka mid ah ee loo xilsaaray kormeerka booqashooyinka waa inuu warsadaa qof kasta oo booqasho ugu yimaada maxbuus, magaciisa iyo halka laga helo, haddii shaki ka galana wuxuu awood u leeyahay inuu baaro ama la baaro qofkaa booqashada u yimid. Baaristaasi waa in aanay ku dhicin maxbuus hortiisa ama qof kale oo booqasho u yimd, baartista dadka wax soo booqday, waxaa fulinaya xubin lab ama dheddig hadba qofka wax soo booqday kuu yahay.

6. Booqashada maxbuuska la soo booqanayaa waxay ku xiran tahay had iyo jeer oggolaanshaha max/ka

Qodobka 57aad
SHURUUDAHA LA XIRIIRA QORITAANKA WAR/HA.

Waxaa waajib ku ah Taliyaha Xabsiga ama xubinta kale ee uu u xilsaaray in uu akhriyo warqad kasta oo u socota ama ka socota maxbuus. Hadday la noqoto warqaddaas inay ku qoran yihiin waxyaabo aan la oggolan karin bixitaanka ama soo gelitaankooda Xabsiga, wuxuu Taliyaha Xabsiga ama xubintii kale ee loo xilsaaray awood u leeyahayinuu joojiyo warqaddaas una sheego maxbuuska joojinta warqadda hadday tahay mid baxaysa, fursadna uu u siiyo inuu mar labaad soo qorto kana reebo wixii la diiday, haddii uu ku soo celiyo waxyaabihii la diiday, xaqii qoritaanka warqadda wuu ka lumayaa.

Qodobka 58aad
LUMISTA XAQA QORISTAANKA WARQADAHA IYO BOOQASHOOYINKA.

1. Maxbuuska la yimaada anshax xumo ama ku gefa habsamida Xabsiga, wuxuu awood u leeyahay Taliyaha Xabsigu ciqaab ahaan inuu uga qaado xaqii qoritaanka iyo helitaanka warqadaha iyo booqashooyinka muddo aan ka badneyn seddax bilood.

2. Maxbuusku muddadaa uu ku jiro ciqaab asluubeedka, ma yeelan karo booqasho. Hase yeeshee Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu u oggolaado qoritaanka warqadda uu xaq u yeeshay,

Qodobka 59aad

BOOQASHOOYINKA IYO WARQADAHA GAARKA AH.

Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu u oggolaado in maxbuus qorto ama helo warqad gaar ah ama booqasho gaar ah markii ay maxbuusku la soo gudboonaato arrin ka mid ah arrimaha hoos ku qoran,

b) Dhimasho ama jirro culus oo ku timid qof ka mid ah qoyskiisa.

t) Hawl ama arrin qoys oo deg deg ah.

j) Tabaabusho la xiriirta shaqo helid ama kaalmo kale bixitaanka maxbuuska.

x) Abaalgud ahaan, shaqo fiican ama asluub wanaag oo uu la yimid.

Qodobka 60aad

BOOQASHOOYINKA QAREENNADA

1. Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu u oggolaado maxbuuska aragtida qariinkiisa isagoo mar kasta raacaya sharciyada Dalka wixii la xiriira dacwaddiisa ama rafcaanka dacwaddiisa.

2. Taliyaha Xabsigu waa inuu u fududeeyaa qareenka maxbuuska soo booqanaya tabaabushihii aragtida, una siiyaa wakhti si uu ugala xaajoodo maxbuuska wixii arrimo ah ee la xiriira dacwaddiisa.

3. Maxbuusku wuxuu ka arki karaa qariinkiisa hawlo kale oo uu u baahan yahay in sharci ahaan wax looga qabto. Aaragtidaasu waxay ku xiran tahay oggolaanshaha Maxkamadda Sare ama Xeer ilaalinta uu u xiran yahay.

Qodo'bka 61aad

BOOQASHOOYINKA IYO WARQADAHA MAXAABIISTA KALE.

Awoodda qod. 53aad iyo 54aad ee Xeer nidaam yahan, lana xiriira booqashooyinka iyo qoritaanka waraaqadaha waxay saameynayaan kooxaha maxaabiista dhan, iyadoo lagu xirayo shuruudaha hoos ku xusan.

b) La haayayaasha hayntooda ay soo xalaalays ay hay'addii sharci ahaan awoodda u lahayd. Waxaa Taliyaha Xabsigu oggolaan karaa qoritaanka hal warqad iyo hal booqasho oo 15 daqiiqadood ah toddobaadkiiba mar.

t) La hayayaasha hayntooda aaney soo xalaaleyn hay'addii sharci ahaan awoodda u lahayd, waxaa booqashadooda qoraal ahaan ugu soo oggolaanaya madaxda Nabadsugidda Soomaaliyeed ama hay'addii kale ee awood sharci u leh qoritaanka ama helitaanka waraaqaha ee maxaabiista noocaas, waxaa baaris ahaan loogu diraa Nabadsugidda Soomaaliyeed, ama hay'addii kale ee sharci ahaan awood u leh, ka hor intaaney bixin ama gaarin gacanta Maxbuusku.

j) Maxbuuska garsugaha ah waxaa loo oggol yahay

1. qoritaanka hal xaashi oo uu u qorto qoyskiisa todobaadkiiba mar iyo hal uu u qorto qareenkiisa, hadduu sidaa warsado—

II) In uu todobaadkiiba mar arko xubno ka mid ah qoyskiisa ama saaxibadii, kuwaasoo sita xaashi oggolaasho uu soo saxiixay garsoore Maxkamada dacwadiisa gacanta ku haysay ama Xeer Ilaalinta sharci ahaan awoodda u leh.

x) Maxbuuskii loo soo xiro gabid bixin ganaax oo ka soo jeeda amar xukun lagaga doonayo in uu bixiyo, Waxaa Taliyaha Xabsigu awood u leeyahay in uu u oggolaado maxbuuskaas aragti saaxiibadii ama qoyskiisa maalin kasta todobaadka dhexdiisa saacadaha shaqada ama xiriir qoritaan warqadeed oo uu la yeesho xubnahaas, si loogu fufudeeyo bixinta lacagta, taas oo muteysiin karti bixitaankiisa.

Qodobka 62aad

BOOQASHOOYINKA IYO QORITAANKA WARQADAHA MAXAABIISTA SHISHEEYAHA

1. Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu u oggolaado maxaabiista shisheeyaha ah in ay xiriir la yeeshaan ha'adaha Dibloomaasiga ah iyo Safaaradaha ka wakiilka ah Dalkooda.

Maxbuuska ka tirsan dawlad aan Jamhuuriyadda Dim. Soomaaliya wakiil ka fadhiyin iyo kan magan-ta ah ama aan dal lahayn (Rafugees and Starelees), Waxaa Taliyaha Xabsigu awood u leeyahay in uu u oggolaado in uu xiriir la yeesho hay'adaha Diblocmaasiga ah ee maamusha danaha Dawladiisa ama hay'ad ka-s'a oo waddani ama caalami ah oo ay shaqadeedu tahay in ay ilaaliso ama dhawrto dadkaas oo kale.

3. Booqashooyinka iyo qoritaanka warqadaha la xiriira maxaabiista ku xusan xarafka 1aad iyo 2aad ee qodobkan, waxay ku xiran yihiin oggolaanshaha Taliyaha Guud ee Ciidanka.

Qodobka 63aad

BOOQASHOOYINKA XEER ILAALIYAHA KU XIGEENADIISA IYO WAKIILADIISA

Xeer Ilaaliyaha Guud, Ku xigeennadiisa iyo Wakiilladiisuba waxay booqasho kormeer ah ku tegi karaan Xabsiyada, wixii ay ku soo arkaan xabsiyadaas ay soo booqdeen, waxay warbixin iyo tusaalo uga soo gudbinayaan Taliska Guud ee Ciidanka Asluubta. Culimaaudiinka aqoonsi ka haysta Wasaaradda Garsoorka, waxay booqasho ku tegi karaan xabsiga, iyagoo talo guud ka bixin kara hanuuninta iyo wacdiga Islaamka. Taliyaha Ciidanka Asluubta wuxuu u magacaabi karaa dad gaar ah oo aqoon u leh Diinta Islaamka Wacdiga iyo hanuuninta Maxaabiista.—

QAYBTA SAGAALAAD XIRIIRKA MAXKAMADAHA IYO XABSIYADA.

Qod. 64aad

KALA SAARIDDA MAXAABIISTA

Si loo sugo kala saaridda maxaabiista xukuman iyo kuwa aan xukuneyn, loona fuliyo awaamirta ku dhigan

qo. 23aad ee Xeerka, markii maxbuus garsuge ah ama la haye ah xukun ku dhaco, waa in Maxkamadda ama hay'adda xukuntay ama go'aanka gaartay soo raacisaa Jideeyaha xukunka oo laga helayo shuruudaha ku xusan qod. 41aad ee xeerka habka ciqaabta; maqnaashaha ama dib u dhaca jideeyuhu wuxuu maxbuuska muteysiinayaa in uu baaqi ku ahaado garsuganimada.

Qodobka 65aad
SIIDEYNTA MAXBUUS MAXKAMADDA HORTEEDA

Markii maxkamad ama hay'ad kale ee sharci ahaan awood u lihi go'aan ku gaarto in maxbuus Maxkamadda ama hay'adda horteeda lagu siidaayo, kaas oo ah xukunsane, Garsuge ama la haye, Maxkamaddii ama hay, addii siideysay waa in ay isla markiiba gaarsiisaa go' aanka xukunka xabsiga maxbuuskaa hayntiisa mas'uulka ka ahaa, si tabaabushaha la xiriira siideynta loo fuliyo, si deg deg ah.—

Qodobka 66aad
SOO HOR JOOJIN MAXBUUS MAX/DA HORTEEDA.

Sida ku xusan qod. 18aad ee Xeerka, markii Maxkamaddu wareysato in la hor keeno maxbuus, waxay Maxkamadda toos ugu diraysaa amar qoraal ah Tal/ha Xa bsiga maxbuuskaasi ku jiro. waxaana amarkaasi saxiixaya Guddoomiyaha Maxkamadda ama Garsoore ka tirsan Maxkamadda warsanayaa maxbuuska. Haddii qofka kaxaynaya aanu ahayn xubin ka tirsan Ciidanka Gacanta ku haya maxbuuska, waa in la xaqiijiyaa shuruudaha hoos ku xusan, kaddibna laga saxeexdaa qofkii kaxaynayay xilqaadka maxbuuska.

b) Xaashida aqoonsiga Ciidanka uu ka tirsan yahay

t) Magaciisa oo Saddexan.

j) Lambarkiisa.—

Timaamaha kor ku xusan waxaa lagu qorayaa diiwaanka iridda Xabsiga.—

Qodobka 67aad
WARGELINTA MAXBUUS AMAR MAXKAMADEED

Markii maxbuus la wargeliyo amar Maxkamadeed ee

la xiriira dacwadiisa ama tu uu marag ka yahay ama tu madani ah, waxaa Maxkamaddu toos ugu direysaa qaabkii wargelinta, Taliyaha Xabsiga Max'buuska lagu hayo. Taliyaha Xabsiguna waa in uu isla markaaba gaarsiiyaa maxbuuska wargelintaa, kana saxiixo qaab-ka kaddibna u celiyaa qaabkii oo saxiixan Maxkamad-dii soo dirtay.—

Qodobka 68aad
SUGIDDA EEDEYSANAHA XABSIGA GUDIHIISA

Markii loo baahdo sugnaasho eedeysane ku jira xabsiga in xubin ka tirsan Ciidanka Booliska ay fuliso hawshaa waxaa amar qoraal ah sidaa ku bixinaaya Garsoore ama Xeer Ilaaliye, xubinta Booliska ah ee hawshaa fulinaysa waxay awood u leedahay in ay booqasho ku tagto Xabsiga waqti munaasab ah oo ay hawshaas fuliso. Taliyaha Xabsiga waa in uu habeeyaa ta'baabushaha la xiriira fulitaanka hawshaas.

QAYBTA TOBANAAD XABSI DHIMID

Qodobka 69aad
MUDDADA IYO XABSI DHIMIDDA XUKUNKA

1. Muddada Xukunaka xarigga Maxbuuku waxay bilaabanaysaa loogana tirinayaa maalintii qabsashada sida ku dhigan qod. 47 XCS.

2. Muddada Xukunka xarigga ee Max'buusku oo ku cad sanado, bilo iyo maalmo waxay tahay bilaha iyo sanadaha kalandarka ah (Calender Months and Years)

3, Maxbuuska waa in la hayaa tan iyo maanta u dambeysa muddada uu ku Xukuman yahay.

4, Mar kasta oo Xukun Dil ah loo beddelo xarig, muddada Xukunku waxay ka bilaabaneysaa maalinta Qa'bashada,—

5. Mar kasta oo xukun Dil ah laga dhigo xabsi Daa'in ama Xukun sanad ah, muddada Xukunku waxaa bilaabmeysaa Xabsi dhimid awgeed, taariikhda maxbuuska la qabtay..

6. Marka maxbuus lagu Xukumo ganaax iyo xarig ama ganaax gadid xarag, wuxuu xabsi dhimid ku yeelanayaa qeybta Xukunka ganaaxa ama muddada uu xabsiga ugu jiro bixin la'aanta ganaaxaas.

7, Maxbuuska Xukuman ee waasha loona beddelo takhtarka maskaxda markii la xaqiijiyay waalidiisa wuxuu xaq u yeelanayaa Xabsi dhimid xarig muddada uu takhtarka ku jiro, Waxaana shardi ah in edebtiisa iyo shaqadiisuba ahaayeen kuwa fiican lana socda shuruudaha ku xusan lambarka 1aad ee qod. 57aad ee Xeerka muddadii ka horreeysay waalidiisa,

Qodobka 70aad
BILOWGA XABSI DHIMIDDA

Habka Xabsi dhimidda awgii, sida ku dhigan qod. 57aad ee Xeerka, taariikhda laga bilaabayaa Xisaabinta Xabsi dhimidda waa taariikhda qabashada Max/ska.

Qodobka 71aad
HABKA XABSI DHIMIDDA OO LOO MACNEEYO MAXBUUSKA.—

Soogelitaanka Maxbuuska, Guddiga soo dhaweynta waa inuu ka dhaadhiciyaa habka muteysiga xabsi dhimidda. Markii uu maxbuusku habsamidda ku gefo lana siiyo ciqaab xabsi dhimid ka qaad waa in sidaa loo wargeliyaa Maxbuuska ay khuseyso.—

Qodobka 72aad
HABKA XABSI DHIMIDDA LOO MAAMULAAYO

Maxbuus kasta oo xukumani wuxuu yeelanayaa gal lagu muujinaayo muddada xukunka, xabsi dhimidda xarigga ee uu yeelan karo iyo xabsi dhimidda laga qaaday, haddey dhacdo. Waxaa kale oo galkaa lagu muujinayaa muddada bixitaanka ugu soo horreysa iyo muddada ugu dambeysa siideyntiisa, kuwaasoo kala ah tan hore, haddii uu muteystay xabsi dhimid, tan dambana tahay markii aanu muteysan xabsi dhimid.

## QAYBTA KOW IYO TOB/D SIIDEYNTA MAXABIISTA

### Qodobka 73aad
### SIIDEYNTA CAADIGA AH EE MAXAABIISTA

Sida ku xusan qod. 59aad ee Xeerka, maxbuuska ku xukuman muddo xarig ah waxaa lagu siideyn karaa oo kali ah.—

1. Markuu dhameysto mudadii xarigiisa loona tixgeliyey xabsi dhimid sida ku xusan qod. 57aad ee Xeerkan.

2. Markay siideyso Maxkamadda Rafcaanka oo burisay xukunkii Maxkamadda hoose.

3. Cafis guud ama gaar ahaaneed oo lagu soo saaray si sharciga waafaqsan.—

### Qodobka 74aad
### KU SIIDEYN BALLAN QAAD SHARAF

1. Maxbuuska waa lagu siideyn karaa ballanqaad sharafta ee sharuudaha ku xusan qod. 34aad ee xeerka.

2. Maxbuus kasta ee ku soo noqon waaya xabsiga marka uu dhamaysto muddadiisa ahayd ku siideynta ballanqaadka sharafta, marka la wargeliyo in uu soo noqdo sida ku xusan xarafka 1aad ee hore, wuxuu gelayaa dembi, marka lagu xukumana wuxuu muteysanayaa ciqaabtuu muteysan lahaa maxbuus fakaday. Maxbuuska noocaas ah waxaa lagu soo qaban karaa jideeyihii hore ee uu ku xirnaa.

3. Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu maxbuus kasta oo ballan qaad sharaf lagu siideeyey uu la yeesho xiriir mar alla markii ay la noqoto.

4. Maxbuuskii lagu siidaayo balan qaad sharaf ee ka soo bixi waayay ama jebiya shuruudaha lagu xiray wuxuu gelayaa dembi marka lagu xukumana wuxuu muteyysanayaa ciqaabta ku xusan qod. 55aad ee Xeerka.

### Qodobka 75aad
### GUDDIGA SIIDEYNTA

1. Waxaa Taliyuhu ka dhisayaa Xabsi kasta Guddi lagu magacaabo Guddiga Siideynta, kaas oo ka koo-

ban Taliyaha Xabsiga oo Guddoomiye ka ah iyo xubin kale oo Taliyuhu magacaabay.

2. Maxbuus kasta oo xukuman lix bilood markay ka hadhay siideyntiisa, Guddiga Siideynta waa inuu arkaa oo uu u soo gudbiyaa Taliyaha xogwaran buuxa oo ku saabsan maxbuuska kana kooban.

b) Caddeyn shaqadiisa iyo edebtiisa ah oo lagu ogaaday muddadii Xabsiga uu ku jiray.

t) Himilada uu ka leeyahay noloshiisa dambe iyo aayatiinka noloshiisa dambe—

Qodobka 76aad
SOO JEEDIN DIB U FIIRIN XUKUN

1. Sida uu dhigayo qod. 58aad ee Xeerku, Taliyaha Xabsigu waa in uu warbixin qoraal ah ka soo bixiyaa Maxbuus kasta oo xukuman, xarigiisuna ka badan yahay 7 sano, markii uu dhammeeyo 4 sano, gaarayna ama lagu wado in uu gaaray cimrigiisu 60 sano.

2. Xog warankaasu waa inuu ka koobnaadaa.
b) Caddeyn la xiriirta shaqadiisa iyo asluubtiisa.

t) Caddeyn Sarkaalka Caafimaadka uu soo dhigay taas oo ka warameyso Caafimaadka Maxbuuska iyo in xabsi ku sii heyntiisa ama xarigiisu ay wax yeelaynayaan Caafimaadka maxbuuska iyo in kale.

3. Taliyaha Xabsigu wuxuu u soo dirayaa xog waranka Taliyaha. Taliyuhuna kaddib markuu helo xog warankaas, wuxuu raacinayaa aragtidiisa wuxuuna u diray aa Madaxweynaha isagoo marinaya Wasiirka.

QAYBTA LABA IYO TOBNAAD FAKASHO

Qodobka 77aad
KA HORTAGGA FAKASHADA

Xubnaha Ciidanka waa in ay aad uga foojignaadaan fakashada Maxaabiista, taas oo ku waajib ah in jaran jarada, xarkaha, silsiladaha iyo wax allaale wixii

kale ee fududeyn kara fakashada ee Xabsiga gudihiisa yaalla daryeelkeeda la hubiyo lana adkeeyo.

Qodobka 78aad

TILLAABOOYINKA LAGA QAADAYO FAKASHADA MARBAY DHADO.

Markii ay dhacdo fakasho maxbuus Taliyaha Xabsiga waa inuu:

b) Amraa in la baaro goobtii fakashadu ka dhacday iyo agagaarkeeda.

t) Waa in isla markiiba la diro koox ka tirsan Ciidanka oo raacdo ah, haday la noqotana hubiyaan.

j) Deg deg ugu diraa war gelin ku saabsan fakashadaas Taliyaha Ciidanka Asluubta, Qeybta Booliska Xeer Ilaaliyaha iyo Guddiga Degmada, isagoo si tifaftiran ugu sheegaya wax allaale wixii la xiriira maxbuuska sida, magaciisa oo saddexan, kan Hooyadiisa, dhar-kiisa, Da'diisa, midabkiisa, kan indhaha, timaha iyo wixii astaamo kale ah ee uu leeyahay.

x) Fura baaris dacwo, taas oo uu kaga gun gaarayo sababta keentay fakashada, ku meeleynaayana xilkii mas'uuliyaddafakashada.

kh) U diraa Taliyaha waqti munaasab ah xogwaran tifaftiran, kaas oo uu kaga waramayo sababta iyo si da fakashada ku dhacday kuna soo lifaaqaa go'aankii dacwadda fakashada.—

Qodobka79aad

Haynta Maxaabiista Fakata Qabashada Kaddib

Maxbuuskii heyn hore oo sharci ah ka fakaday ama isku dayay inuu ka fakado, soo gelitaankiisa dambe waa in loola dhaqmaa in uu yahay qof ay ka suurowda Xabsi jebin iyo fakashaba, haddii aanu la dhaqankaas ka dhaafin Taliyaha Xabsigu isagoo u cuskanaya sabab gaar ah, xubnaha Ciidanka ee loo xil saaray hayntiisana waa in ay si gaar ah uga feejignaadaan.

2. Iyadoo la tixgelinaayo daryeelka nabadgelyada galka Maxbuuska fakada, qabashadiisa kaddib, waxaa lagu qorayaa xarafka (F) oo loola jeedo !Sakade!.

QEYBTA SADDEX IYO TOBNAAD LA DHAQANKA RA FCAANLEYDA, GARSUGAYAASHA IYO LA H SHA.

Qodobka 80aad
RAFCAANLEYDA

1. Maxbuuska Rafcaanleyda ahi muddada uu sugayo go'aanka rafcaanka waxaa lagu haynayaa meel ka gaar ah maxaabiista kale ee xukuman. Haddiise aan xabsiga uu ku jiraa u habeysneyn ama ay la noqoto Taliyaha Xabsiga in aanay suura gal ahayn, wuxuu ka mid ahaanayaa maxaabiista Xukuman.

2. Marka maxbuuska rafcaanleyda ahi uu hor tago Maxkamadda, wuxuu labisanayaa hu'giisa caadiga ahaa, haddiise hu'giisa aanu ahayn mid u qalmo qofnimada, Taliyaha Xabsigu wuxuu siinayaa hu' ka duwan kan Maxaabiista.—

Qodobka 81aad
IS DHEX GALKA GARSUGAYAASHA IYO LA HAAYA YAASHA DHAWRAYA GO'AANKA XALAALAYNTA HAYNTOODA.

Maxaabiista Garsugayaasha iyo la hayayaasha dha wraya go'aanka xalaaleynta hayntooda isku meel ayaa lagu hayn karaa haddii aan Taliyuhu sabab kale awgeed amar ku bixin kala saaridooda. Maxaabiista noocaas ah, hayntooda ka gooni bay ahaaneysaa kuwa Xuxuman sida uu dhigayo qod. 23 xarafkiisa hore ee xeerkan.

Qodobka 82aad
MAXBUUSKA KU EEDEYSAN DILKA

1. Maxbuuska ku eedeysan Dil, haddii ay suuragal tahay, waxaa lagu haynayaa meel gaar ka ah, waxaana la siinayaa feejignaan buuxda. Hase ahaatee, dhaqankiisa kale sida cuntada, gogosha iyo dharka, wuxuu la mid ahaanayaa Garsugayaasha.

2. Maxbuuska ku eedeysan Dil, marnaba looma diri karo shaqo.—

Qodobka 83aad
1. Mararka qaarkood, haddii loo baahdo danta guud

ee Qaranka awgeed, maxbuus garsuge ah, ama la haye ah dhawraya go'aankii xalaaleynta hayntiisa, waa lagu Shaqeyn karaa.—

2. Marka ay shaqeeyaan maxaabiista noocaas ahi waxay yeelanayaan wax allaale wixii abaalgud ah ee uu siinayo Xeerka iyo Xeer nidaamiyahan maxaabiista Xukuman.—

Qodobka 84aad

## H U G A

Markii hugga maxb ska garsugaha ahama la hayaha ahi aanu la socon dhawritaanka Caafimaadka Xabsiga, Sarkaalka Caafimaadku wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya daryeelidda Caafimaadka, inuu ku amro in la buufiyo ama la dhaqo huga maxbuuska, muddada dhiqitaanka ama buufiska waxaa maxbuus ka la siinayaa kumeel gaar ahaan huga Xabsiga.

Qodobka 85aad

## GARSUGAYAASHA IYO LA HAAYAYAASHA DHAWRAYA GO'AANKA XARIGOODA.

1. Garsugayaasha iyo la hayayaasha dhawraya Go'aanka Xalaaleynta xarigooda, ee aanu Sarkaalka cafimaadkuna ka reebin shaqada, waxay yeelanayaan cuntada loogu tala galay maxbuuska shaqeynaya oo b/da

2. Haddii Garsugaha ama la haayaha dhawraya go'aanka Xalaaleynta xarigiisa uu doorto in cunto looga keeno dibadda xaq uma yeelan karo cuntada Xabsiga.

## QAYBTA AFAR IYO TOBNAAD MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN.—

Qodobka 86aad

## T A K O O R I D D A

1. Maxbuus kasta oo Dil ku xukuman waxaa lagu haynayaa edegga daryeelka buuxa, waxaana illaalin Joogto ah ku haynaya Ciidanka ku filan habeen iyo Maalinba.—

2. Maxbuus kasta oo dil ku xukuman fulitaankii Dilkiisuna soo dhammaaday waxaa si joogto ah u ilaali naya xubno Ciidanka ka tirsan, oo aan tiradoodu ka yarayn seddex qof ugu yaraanna midkood uu yahay Sarkaal xigeen.—

3. Taliyaha Xabsiga waxaa si gaar ah loo xil saara yaa in uu hubiyo daryeelka nabadgelyada maxbuuska Noocaas ah.—

Qodobka 87aad
QORITAANKA IYO HELITAANKA WARAAQAHA

1. Qoritaanka iyo helitaanka waraaqaha maxbuus ka Dilka ku xukuman waxay ahaan doonaan sida soo socota. iyadoo mar kasta la tixgelinaya baahida cadaadiska la xiriira daryeelka nabadgelyada oo uu ku taliyo Taliyaha Xabsigu.—

b) Go'aanka xukunka dilka lagu xukumay kaddib Maxbuusku wuxuu u qoran karaa seddex warqadood qoyskiisa. saaxiibadiisa iyo Qareenkiisa. Kaddibna warqad todobaadkiiba.—

t) In uu waraaqo ka helo qoyskiisa, saaxiibadiisa iyo Qareenkiiba hadba sidii loogu soo diro.

2. Wax allaale wixii waraaqo ah ee u socda ama ka socda maxbuuska waxaa baaraya Taliyaha Xabsiga naf ahaantiisa ama xubin Sare. ee uu wakiishay. Warqad kasta oo waxaan la oggolayn ay ku qoran yihiin waa la joojinayaa.—

3. Taliyaha Xabsigu wuxuu u maamulayaa waraaqaha u socda ama ka socda maxbuuska ku xukuman dil Buug gaar ah oo u habeysan sida soo socota:

b) Magaca iyo lambarka Maxbuuska.

t) Magaca iyo ciwaanka qofka warqaddu u socoto ama warqadda laga helay.—

j) Wixii warqaddaa ku qoran oo la soo koobay.

x) Wax allaale wixii aan la oggolayn ee warqadaha ku qoran.—

kh) Tallaabadii warqaddaa laga qaaday.

Qodobka 88aad

BOOQASHOOYINKA MAXBUUSKA DILKA KU X/MAN

Iyadoo la tixgelinaayo qod. 38aad ee Xeerka iyo qaybta 8aad ee Xeer nidaamiyahan oo la xiriira booqashooyinka maxaabiista iyo iyadoo la raacayo adkeynta uu ku arrimiyo Taliyaha Xabsigu danta daryeelka nabadgelyada awgeed, booqashooyinka maxbuuska dilka ku xukuman waxay ahaan doonaan sida hoos ku xusan oo keli ah.

b) Sarkaalka Caafimaadka ee lagu xusay xarafka 1aad ee qodobka 38aad ee Xeerka, kaas oo ah Sarkaalka Caafimaadka ee Xabsiga, haddii loo baahdo wuxuu ta shi la yeelan karaa, oggolaashaha Taliyaha Xabsiga kaddib, takhtarkii kala ee uu uga baahdo daryeelka Caafimaadka Maxbuuska.

t) Hay'adaha Cadaaladda ka tirsan awoodana u leh booqashada maxbuuska Dilka ku xukuman, iyadoo hawsheeda gudaneysa, waa in ay soo weydiistaa Taliyaha Xabsiga booqashada noocaas ah, lamana oggolaan karo, kaddib markii go'aankii Dilka la oggolaado ee dhawrayo fulitaanka xukunkaas.—

j) Taliyaha Xabsigu wuxuu u oggolaan karaa maxbuuskii ku xukuman Dilka booqasho qareen ee ku xiran shuruudaha soo socda:

I) Booqasho la xiriirta Dacwadda.

II) Qareenka oo soo warsaday booqashada ugu yaraan laba saac ka hor.

III) Booqashaduna waa in ay ahaataa saacadaha Xabsigu shaqaynayo.

x) Caddeymo qoraal ah oo maxbuusku sameeyey ama xusuusaha (notes) uu qaatay qareenku waxaa la tusayaa Taliyaha Xabsiga si uu ugu qanco in ay yihiin

kuwa la xiriira dacwadda maxbuuska oo aan si kale loo gu talo gelin haddey tahay wargeysyada ama dad kale Taliyaha Xabsigu uma oggolaan karo qareenka la bixitaanka caddeymaha iyo xususaha haddii aanu ku qancin ulajeeddada.—

kh) Taliyaha Xabsigu wuxuu u oggolaan karaa maxbuuska Dilka ku xukuman inay soo booqdaan xaaskiisa iyo caruurtiisa qaan gaarka ah iyo Waalidiintiisa haddii ay la socdaan, waxayna booqashooyinkaas ku xiran yihiin shuruudaha soo socda:

b) Maxbuuska ku xukuman Dil lama soo booqan karo toddobaadka ugu horreeya xariggiisa iyo toddobaadka ugu dambeeya ka hor fulitaanka Dilka.

t) Laba qof wax ka badan isku mar ma booqan karaan maxb ska.—

j) Muddada booqashadu waxay ku eg tahay 20 Daqiiqadood.—

### Qodobka 89aad
### J I M I C S I

Maxbuus kasta oo dil ku xukuman waxaa xerada uu ku yaal edegga lagu hayo ku qaadanayaa Jimicsi hal saac ah, maalin kasta, haddii sidaa wax ka hor yimaadaa jirin, wuxuuna qaadanayaa jimicsiga isagoo ay ilaalinayaan ciidan ka kooban ugu yaraan seddex xubnood oo midkood yahay Sarkaal xigeen.

### Qodobka 90aad
### K U T U B

Maxbuuskii ku xukuman dil waxaa loo oggolaanayaa Kutub Diini ah, kuwo Idiyoolojiyadeed iyo kuwo suugaan ah, haddii uu warsado Taliyaha Xabsiga.

### Qodobka 91aad
### CUNNO GAAR AH HABEENKA KA HORREYSA FULITAANKA DILKA.

Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu siiyo maxbuuskaas dilka ku xukuman cunno gaar ah oo uu doortay habeenka ka horreysa fulitaanka Dilka.

### Qodobka 92aad

### DARDAARAN

Fulitaanka dilka ka hor, wuxuu Taliyaha Xabsigu weydiisanayaa maxbuuska in uu doonayo in uu dardaarmo. Hadduu maxbuusku doono in uu dardarmo, waxaa laga qorayaa dardaarankaas isagoo uu goob joog ka yahay Garsoore Maxkamadeed iyo Qareenkiisa waxaana loo gudbinayaa qofka uu khuseeyo. Haddii uu ku jiro dardaarankaas wax aan Sharcigu oggoleyn, Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu ka reebo.

## QAYBTA SHAN IYO TOBNAAD

## QUBANE

### Qodobka 93aad

### WAAJIBAADKA XUBNAHA KA SAARAN XAB/YADA

1. Waxaa ku waajib ah xubnaha Ciidanka oo dhan in ay u gutaan shaqadooda iyo mas'uuliyaddooda la xiriirta Xabsiyada sida uu dhigayo Xeerka Aasaaska Ciidanka Asluubta iyo Xeer lambar 7 soona baxay 31-12-71, iyo Xeer Nidaamiyaha ama amarrada joogtada ah, tusaalooyinka rasmiga ah, amarrada guud ama gaar ee uu soo saaro Taliyuhu kuna saabsan maamulka habboon ee Xabsiyada Jam. Dim. Soomaaliya.

2. Jebintaama ku xad gudubka ka yimaada xubin Ciidanka ka tirsan ee la xiriirta Xeerka, Xeer Nidaamiyaha, Amarrada joogtada ama Tusaalooyinka rasmiga ah, wuxuu ahaanayaa qof galay dembi wuxuuna muteysanayaa ciqaab sida sharcigu dhigayo.

### Qodobka 94aad

### WAAJIBAADKA ILAALINTA MAXAABIISTA

1. Markii loo wadayo maxaabiis xabsiga dibadiisa, hadday tahay shaqo ama siyaabo kale, Taliyaha Xabsigu ama xubinta kale ee uu wakiishay waxaa ku waajib ah in uu qaado tallaabo kasta oo looga baahan yahay daryeelka nabadgelyada.—

2. Tirada maxaabiista iyo Ciidanka ilaalinta isu dheelitirkooda iyo qalabkooda lagu isticmaali karo goob

kasta ama waqti kasta waxaa lagu caddeynayaa amarrada joogtada ah, hase ahaatee meeshii uu joogo Ciidan ku filan xubin looma dhiibi karo. b maxbuus haddii mee sha shaqadu ay tahay go'doon, kana baxsan tahay Xabsiga. Marka maxaabiistu ay u shaqaynayso koox wadajir ah, tirada maxaabiista xubinta kaxayn karto waxaa goyn kara Taliyaha Xabsiga.—

Qodobka 95aad

ABUURISTA SANDUUQA ABAALGUDKA IYO G AXA

1. Taliyuhu wixuu abuurayaa Sanduuq lagu maga caabo Sanduuqa Abaalgudka iyo Ganaaxa.

2. Sanduuqa waxaa lagu ridayaa wax allaala wixii lacag ganaax ah iyo wax allaala wixii ka soo baxa alaabo mamnuuc ah oo la gaday, xabsi kasta ha laga qabtee, ganaaxa iyo alaabta mamnuuca ah ee la qabtay oo loo cuskaday Xeerka iyo Xeer nidaamiyaha ama amarrada joogtada ah,—

3. Sanduuqa Abaalgudka iyo ganaaxa waxaa lagu haynayaa Taliska Ciidanka Asluubta iyadoo lagu muujinaayo wax allaale waxa lacag ah ee ku soo dhacay, meesha ay ka yimaadeen, taariikhda lacagta la qabtay wixii Lacag ah ee Laga bixiyay TaLiyuna saddexdii bil kasta mar buu u dirayaa nuqul Xisaabta Lacagtaas ah Xabsiyada oo dhan.—

4. Taliyuhu wuxuu awood u leeyahay in uu oggolaa in Sanduuqa looga dhiibo siyaabaha soo socda:

b) In laga kaalmeeyo Xaaska iyo Caruurta Maxbuuska dhintay.—

t) In Abaalgud laga bixiyo lana xiriira tartamo ci yaareed oo dhex mara Maxaabiista.—

j) In Abaalgud laga siiyo maxbuuskii ku muteysta hawl Qaran uu qabtay.

x) In laga kaalmeeyo horumarinta waxbarashada Ciyaaraha, madadaalada, Samafalka dhaqdhaqaaqyada kale ee u habeysan danta maxaabiista ee sharciga ah.

kh) Iyo wax allaale wixii kale oo ay la noqoto Taliyaha in uu ka kaalmeeyo.—

5. Taliyaha oo kaliya ayaa amri kara in Sanduuqa lacag laga bixiyo—

6. Xabsi kasta Taliyaha ka mas'uulka ah wuxuu qoraal ugu soo gudbinaya Taliyaha, Maxaabiista u qala nta abaalgud iyo meeluhuu qabo in San/qa laga kalmeyo

## QAYBTA LIX IYO TOBNAAD GABAGABAYN

### Qodobka 96aad
### T I R T I R I D

Xeer Nidaamiyaha Xabsiyada lambar 453 oo ka socday Gobollada Waqooyi waa la tirtiray.

### Qodobka 97aad
### DHAQAN-GELID

Xeer Nidaamiyahan wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada

Muqdisho, 9 Ago. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

## LIFAAQA (B) CUNTADA MAXAABIISTA

CUNTADA MAXAABIISTA WAXAY KA KOOBAN TAHAY SIDA HOOS KU TAXAN:

1. Hilibka 200 Garaam 3 Maalmood Todobaadkiba.
2. Caano 250 Garaam 4 Maalmood Todobaadkiiba.
3. Rooti ama Canjeero 56 Garaam Maalintii.
4. Galley ama Mesegga (Haruur) 230 Garaam M tii.
5. Khudaarta 80 Garaam Maalintii.
6. Shaah 2 Garaam Maalintii.
7. Sonkor 56 Garaam Maalintii.
8. Saliid 30 Garaam Maalintii.
9. Basal 15 Garaam Maalintii.
10. Cusbo 10 Garaam Maalintii.
11. Xaabo 1380 Garaam Maalintii.
12. Bariis Baasto 140 Garaam Maalintii.
13. Saabuun Dhar 100 Garaam Toddobaadkiiba.
14. Saabuun Qubeys 100 Garaam Todobaadkiiba.

FIIRO GAAR AH:

Gobollada ama Degmooyinka aan laga heli karin cuntada qaarkeed waxaa loogu beddelayaa cuntada mo wjuudka ah sida:

1. Hilibka ama Caano waxaa lagu beddeli karaa Kalluun ama Digir.

2. Rooti waxaa loogu belleli karaa Canjeero ama Moofo (Kidaar) ama Timir.

3. Khudaarta waa inay ahaato isku jir sida Bocor, Yaanyo, Basbaas, Kaabaj IWM.

4. Haddii laga waayo Gobolka Galley ama Mesego waxaa loogu beddeli karaa Bariis (sida Go/ka Bari.)

LIFAAQA (T) HUGA IYO GOGOSHA MAXAABIISTA·

HUGA IYO GOGOSHA MAXAABIISTA MAXAY KA KOOBAN YAHAY SIDATAN:

R A G G A:

1· Shaati 2 xabo sanadkiiba·
2· Surwaal Dheer 2 xabo sanadkiiba,
3· Surwaal Dheer 1 xabo sanadkiiba·
4· Ka'bo Goomo ah (lugo Baabuur) 2 Pair san/kiiba·

HAWEENKA:

1· Canbuur 2 xabo sanadkiiba·
2· Googorad 2 xabo sanadkiiba,
3· Surwaal Gaaban 1 xabo sanadkiiba.
4· Nigis 2 xabo sanadkiiba·
5· Shanlo 1 Lixdii Biloodba·
6· Shaambo hal Dhalo 3 biloodba·
7· Saliid Timo 5 Garaam Maalintiiba·

GOGOSHA MAXAABIISTA:

1· Dermo 2 xabo sanadkiiba·
2· Busto 2 xabo sanadkiiba·
3· Go'yaal (Dhiinsoole) 2 xabo sanadkiiba·

FIIRO GAAR AH,

Meeshii awood Dhaqaale ama maamul asmaxdo ama Caafimaad dartii loogu baahdo, waxaa derinta loogu beddeli karaa Sariir iyo Joodari,

Maxaabiista ku xiran Xabsiyada ku yaal Xeebaha Badda Cas, waxaa la siinayaa hal busto oo keliya.

MAACUUNKA IYO WIXII RAACA:

1. Gaaweelo ama saxan macdan ah 1 sanadkiiba.
2. Koob Biyaha 1 sanadkiiba.
3. Koob Shaahi 1 sanadkiiba.
4. Qaaddo 1 sanadkiiba.

LIFAAQA (X) CUNTO CIQAABEED:
CUNTO CIQAABE D WAXAY KA KOOBAN TAHAY SIDA HOOS KU XUSAN:

1. Galley ama Meseggo 200 Garaam
2. Bariis ama Baasto 100 Garaam
3. Cusbo 10 Garaam

FIIRO GAAR AH

Cunto Ciqaabeedka waxaa la siinayaa Maxbuuska 3 Maalmood oo isku xiga, maalin afraadka waxaa la siinayaa cunto caadi ah. Ilaa ay ka dhamaato muddada uu ku xukuman yahay Ciqaabta.

## MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdher Burco.

Ujeeddo Baafin Wareega ee Lumay

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeega War-ee Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka,

HADDUU ARKAY: Qod. 69 9.9. 65 N 2 Lumid Jeg. War L.489715 Sh.So. 20.000 J/W L. 489717 Sh;So; 20,000 J/L. 489723 20,000 kuna qoran Cab/laahi Aadan Naleye Maxamed.

Wuxuu Amrayaa In loo Cusbooneysiiyo Jeegagaas War. ee kor ku xusan J/le Cab/laahi Aadan Naalleye Maxamed markii ay ka soo wareegto muddo 20 maalmood laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

WAXAA LAGA CODSANAYA

In Jeegaga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro J/le Cab/laahi Aadan Naleeye Maxamed iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Xaliimo X. Cabdi Aadan Tanza'nis

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdher Burco.

Maxamed X. Cab/qaadir

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 521477 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 30.000 uu iska lahaa J/le Maxamed Sulub Cawad sida ku cad warqadda Lam. 00857 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad taariikh 22.10.84

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee sharciga lam. 2 ee 9.9.84

WUXUU XEERIYEY.

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 521477 oo ku qoran magaca Maxamed Sulub Cawad ayna ku jirto Sh.So. 30.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u beddelo J/le Maxamed Sulub Cawad Buugga Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.10.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 442